

Barnaamijka tababarka isdhexgalka **Towards University** waxa uu ka bilaabmi doonaa dayrta 2023 ka Akaadeemiyadda Työväen ee Kauniainen. Akaadeemiyaddu waxa ay ku taallaa aag magaaleedka Helsinki waxana si fudud loogu gaadhi karaa gaadiidka dadweynaha. Tababarku waxa uu socdaa ugu yaraan hal sanad akaadeemiyadeed waxana ku jira ugu yaraan 40 saacad waxbarasheed. Xaaladaha qaar, tababarku waxa uu socon karaa laba sanad akaadeemiyadeed waxana ku jiri kara ugu badnaan 80 saacad akaadeemiyadeed.

Muddada tababarka: 14 ka Agoosto 2023 - 20 ka Juun 2024

Waxa uu ka kooban yahay tababarku: Barasho muddo kooban ah oo luuqadda Finnish ka ah, xirfadaha nololsha shaqeed, xirfadaha bulshada, waxbarashada shaqada-dhexdeeda iyo barashooyin kale oo taageera isdhexgalka. Barnaamijka waxa ku jira taageero hagid barasho dhamaystiran ah tababarka oo dhan.

Kharashaadka: Tababarku bilaash baa uu u yahay ardayda muddada isdhexgalka. Waxa uu u baahan yahay barasho wakhti-dhamaystiran ah.

Yaa loogu talagalay: Dadka waaweyn ee qaxootiga ah ee dhammaystay dugsiga sare ama waxbarasho ka saraysa ee usoo guuray Finland labadii sano ee u dambaysay ayaa ka qaybqaadan kara tababarka. Tababarku waxa uu munaasab ku yahay ardayda leh xirfadaha waxbarasheed ee xooggan iyo awood waxbarasho luuqadeed oo wanaagsan. Waa ay wanaagsan tahay in la barto aasaasiyaadka luuqadda Finnish ka.

Ujeedka tababarka: Ujeedka tababarku waa in la xoojiyo ku daritaanka bulsheed ee qaxootiga iyo in laga caawiyo qaxootiga aqoonta leh inay ka helaan shaqo boosas khibradeed oo/ama tababar dheeraad ah ka qaataan jaamacadaha Finnish ka.

Si aad u codsato iyo si aad macluumaad dheeraad ah ugu hesho Finnish, Ingiriisi, Raashiyaan, Yukrayniyaan, Beershiyaan, Carabi iyo Soomaali:

<https://www.akatemia.org/kotoutumiskoulutus>

Minna Aitola MA, M.Soc.Sc

Macallinka masuulka ka ah Waxbarashada Qaxootiga

045 788 188 32 koto@akatemia.org